

FOR IMMEDIATE RELEASE

Jan. 30, 2017

Qoraalka ka soo baxay xafiiska Ed Graff oo ah kormeeraha guud ee dugsiyada dadweynaha Minneapolis oo uu ku taageerayo qoysaska iyo ardayda dhigta dugiyada dadweynaha Minneapolis xaaladooda socdaalka

MINNEAPOLIS – Xafiiska kormeeraha guud Ed Graff ee dugsiyada dadweynaha Minneapolis ayaa soo saaray maantay qoraal uu ku taageerayo qoysaska iyo ardaydeena xaaladahooda socdaalka.

“Bishii Novembar ee la soo dhaafay, ayaan u qoray qoraal shaqaalaha iyo qoysaska dugsiyada dadweynaha Minneapolis. Maantay wali waxaan aaminsanahay qoraalkeygii in uu wali yahay mid jira, howgaladeena waxba iskama badalayaan: Waxaan halkaan u joognaa inaan hubino in ardaydeenu waxbartaan.

“Dugsiyada dadweynaha Minneapolis waxaa uu soo dhaweynayaa ardayda dhaqamada kala duwan ee ka kala yimaaday dunida dactaladeeda, diintkasta uu kasoo jeedo iyo jinsiyad kasta uu kasoo jeedo iyo dhaqaalo kasta. Waa waajib inaan u argo kala duwanaanshaheena awooda kaliya aanu haysano in ay tahay.

“Xaaladaha hada jira waxay u muujinayaan ilmaheena waxyaabo ka duwan waxa ay horay u yaqaaneen, si kastaba ha ahaatee, waxay taas ku abuurtay walaac iyo cabsi aan horay loo arag. Taas ayaa sabab u aheyd, inay ansaxiyaan gudiga waxbarashada dugsiyada Minneapolis [passed a resolution](#) qaraarka adkeeynaya in dagmadeena ay ahaato meel amaan u ah dhamaan ardayda iyo qoysaskooda, iyadoon loo eegaynion xaaladooda socdaalka (immigration), ama asalka qoomiyada ay kasoo jeedaan iyo luuqadooda. Ma aha doorka dagmadeena waxaan aan nahay urur waxbarasho howsheenu maahan in aan ardayda iyo qoysaskooda weydiinayno xaaladahooda socdaalka. Doorka aan leenahay waa in aan caruurteena waxbaro; si ay wax u bartaan waa inaan sugnaa maankooda ayna dareemaan inay amaan yihiin.

“Maalmaha soo socda, madaxdeena dugsiyada ayaan ku guubaabinaynaa inay garab istaagaan ardaydeena iyo qoysaskooda. Nidaam ahaan, waxaa naga go’an in aan siino taageerada shaqale ee loo bahan yahay in la abuurto xiriirka qoysaska tusayno inaan sugayno amaanka ardaydeena, si niyad leh, ugu danbeyntii si loo caawiyo caruurta inay gutaan waajibaadkooda waxbarasho oo ay guul ka gaaraan.”

###